

Suurat Al-Inshiqaaq

سُورَةُ الْاِنْشِقَاقِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Marka Samadu jeexjeexanto (qiyaamada).

2. Oy Eebe Addeecdo waana xaq addeeciddiisunee.

3. Marka dhulka la fidiyo (qiyaamada).

4. Oo uu soo tuuro waxa ku hoos jira, kana madhnaado.

5. Oos Eeba Addeeco waana xaq addeeciddaasina.
(wuxuu la kulmi Ruuxwalba Camalkiisa).

6. Dadow waxaad u dhibboon ood u camalfali xagga Eebe, waadna la kulmi.

7. Ruuxiise Kitaabkiisa (fiican) Midigta laga siyo (waa mu'minkee).

8. Waxaa la xisaabin xisaab fudud.

9. Wuxuuna ku noqon Ciddiisii (Janada joogtay) isagoo faraxsan.

10. Ruuxiise Kitaabkiisa laga siyo gadaashiisa (waa Dadka xune).

11. Wuxuu u yeedhan Halaag.

12. Wuxuuna gali Naarta Saciira.

13. Maxaa yeelay Markuu dadkiisii dhexjoogay yuu kibirsanaa (Adduunkii).

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

إِذَا السَّمَاءُ انشَقَّتْ ﴿١﴾

وَأَذِنَتْ لِرَبِّهَا وَحُقَّتْ ﴿٢﴾

وَإِذَا الْأَرْضُ مُدَّتْ ﴿٣﴾

وَأَلْقَتْ مَا فِيهَا وَتَخَلَّتْ ﴿٤﴾

وَأَذِنَتْ لِرَبِّهَا وَحُقَّتْ ﴿٥﴾

يَتَأْتِيهَا الْاِنْسَانُ اِنْكَ كَادِحٌ اِلَى رَبِّكَ كَذًا فَمَا لِقَابِهِ ﴿٦﴾

فَأَمَّا مَنْ أَوْفَى كَتَبَهُ بِمِيزِينِهِ ﴿٧﴾

فَسَوْفَ يَحَاسِبُ حِسَابًا يَسِيرًا ﴿٨﴾

وَيَقْبَلُ إِلَىٰ أَهْلِهِ مَمْرُورًا ﴿٩﴾

وَأَمَّا مَنْ أَوْفَى كَتَبَهُ وِرَاءَ ظَهْرِهِ ﴿١٠﴾

فَسَوْفَ يَدْعُوا ثُبُورًا ﴿١١﴾

وَيَصِلُ سَعِيرًا ﴿١٢﴾

إِنَّكَ كَانَ فِي أَهْلِهِ مَمْرُورًا ﴿١٣﴾

14. Wuxuuna malaynhayay inuusan
Eebe u soo noqonaynin (qiyaame).

إِنَّهُ طَنَّ أَنْ لَنْ يَحُورَ ﴿١٤﴾

15. Saas ma ahee Eebe waa arkaa.

بَلَىٰ إِنْ رَبَّنَا كَانَ بَدءَ بَصِيرًا ﴿١٥﴾

Qudrada Eebe iyo Awooddiisu wax walba waa ka sarraysaa, maxaa yeelay isagaa waxwalba ahaysiiyay, wax awooddiisa ka baxsanna ma jiro, Laba Waddo umbaana jira, Ruux walbana wuxuu qaadi Tuu u camal-falo.

Rasuulka Eebana Naxariis iyo nabadgalyana korkiisa Eebe ha yeelee wuxuu yidhi: Idinku Waxaad Falaysaan Camallo aan la Aqoonin, Waxayna U Dhawdahay Inuu U Soo Noqdo Kii Maqnaa Reerkiisii oo uu Farxo Ama Naxo. Waxaa wariyay Dhabaraani. Al-Inshiqaaq (1-15).

16. Waxaan ku dhaartay «buu yidhi
Eebe» Midabka Qorrax dhaca.

فَلَا أَقْسِمُ بِاللَّفْحَقِ ﴿١٦﴾

17. Iyo Habeenka iyo wuxuu qariyay.

وَأَتْلِيلَ وَمَا وَسَقَ ﴿١٧﴾

18. Iyo Dayaxa markuu Nuurku buux
Samo.

وَالْقَمَرَ إِذَا انَّسَقَ ﴿١٨﴾

19. Ee Dadkow waxaad koraysaan
xaalado kala duwan.

لَتَرَكُنَّ طَبَقًا عَن طَبَقٍ ﴿١٩﴾

20. Dadka maxaa u sugnaaday oy la
rumaynwaayeen (xaqa).

فَعَالَهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٢٠﴾

21. Marka Quraanka lagu akhriyana
ayna u sujuudaynin.

وَإِذَا قُرِئَ عَلَيْهِمُ الْقُرْءَانُ لَا يَسْجُدُونَ ﴿٢١﴾

22. Saas ma ahee kuwa Gaaloobay
waxay beenin (xaqa).

بَلِ الَّذِينَ كَفَرُوا يُكْذِبُونَ ﴿٢٢﴾

23. Eebana waa ogyahay waxay qar-
san.

وَاللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا يُوعُونَ ﴿٢٣﴾

24. Ugu bishaaree caddibaad daran.

فَبَشِّرْهُمْ بِعَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٢٤﴾

25. Hase yeeshee kuwa rumeeyay xa-
qa camalfiicanna falay waxay mudan
Ajri aan go'aynin.

إِلَّا الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ

لَهُمْ أَجْرٌ غَيْرُ مَمْنُونٍ ﴿٢٥﴾

Eebe wuxuu ku dhaartay in dadku mari xaalado kala duwan, sida yarida, Duqnimada, Caafimaadka, Cudurka, Hodontinimada, Saboolnimada iyo Geerida iyo Nolosha, haddana saas Dadku isagoo arka yuu xaqa beenin oo leexan, Ruuxiise Camal fiican la yimaadda lagama nusqaamiyo ee wuu la kulmi isagoo dhan, Dadkuna shaqay ku dhibboon, waxaana la huraynin la kulanka Eebe. Al-Inshiqaaq (16-25).